# WAREYSIGA BOLIISKA EE DHALINYARADA

## Macluumaadkii waalidiinta

somali


Saldhigga Boliiska ayaa lagaaga yeeray waayo boliiska ayaa rumaysan inuu ilmahaagu galay dambi. Boliisku waxay doonayaan inay wareysi la yeeshaan ilmahaaga oy arrimahaas wax ka weydiiyaan.

Sharciga ayaa faraya in waalid ama ilaaliye joogo goobta boliisku ku wareysanayo qofkii da'diisu kayartahay 18 sano. Balse, haddii aadan iman Karin wareysiga, boliisku waxay abaabuli karaan qof u tababaran oon sarkaal boliis ahayn inuu joogo goobtaas.


## 1.

### Maxaa kula gudboon?

- Inaad joogtid saldhigga boliiska si aad u taageertid ilmahaaga.
- Inaad hubisid inay wanaagsanyihiin iyo inay u baahanyihiin cabitaan ama cunno, in la tuso dhakhtar ama rabaan musqul. Haddii ay waxyaabahaas doonayaan, warso boliiska inay u diyaariyaan.
- Haddii aad dareensantahay inuu ilmahaagu waxba fahmayn ama uusan ladnayn, u sheeg boliiska.
- **Adiga iyo ilmahaaguba waxaad xaq u leedihiin af-celiye/turjumaan.** Weydiiso boliiska inay kuu diyaarshaan haddii loo baahdo.




- Ku dhiirageli ilmahaagu inuu la kulmo qareen ama looyar haddii ay doonayaan talo. Waxay ku heli karaan **talo sharciyeed lacag la'aan ah** telefoonka saldhigga biliiska iyagoo wacaya **1300 79 11 89. Weydiiso boliisku inay kuu wacaan lambarkaas** kadibna looyar ayaa idinkasoo wici doona saldhigga, muddo toban daqiiqo ah.




## 2.

### Maxaa dhici doona?

- Wareysiga kahor, waa in lagu siiyaa goob aad kula hadasho ilmahaaga.
- Markaas kadib, boliiska ayaa wareysi la yeelan doona cunuggaaga.



# 3.

## Inta wareysigu socdo xusuusnow in:

→ Ilmahaagu boliiska u sheego magiciisa iyo deegaankiisa.

→ **Ilmahaagu wuxuu xaq u leeyahay inuusan ka jawaabin su'aalo kale.** Waxay oran karaan "ka hadli mayo" su'aalaha boliiskoo idil. Taasi kama horistaagi doonto in la siiyo dammaanad (taasi waa, in loo ogolaado inuu katagi karo saldhigga). Wixii uu ku yiraaho boliiska ayaa looga dacwadeyn karaa maxkamadda. Balse, sharcigu **uma** qaadanayo qofna dambiile sababtoo ah inuu ku jawaabay " ka hadli mayo" su'aalihii boliiska.

→ Ilmahaagu faafaahin ayuu boliiska weydiisan karaa haddii uusan fahmin su'aalaha

→ **Waa inaysan iska ogolaan wixii layiraahdo haddii aysan fahmin ama aysan u malayn edeb darro in la diidaa.**

# 4.

## Wareysiga ka dib

→ Waa inaad la joogtaa haddii ay boliisku doonayaa inay faro ka qaadaan ilmahaaga.



→ Sarkaal boliis ayaa adiga iyo cunuggaba idin weydiin doona in aad ku qanacsanaydeen macaamilkii boliiska. Haddii aadan ku qanacsanayn sida adiga ama ilmahaaga loola dhaqmay, waxaa habboon inaad u sheegtaa boliiska.

→ Waxaa dhici kadha in la siiyaa ilmahaaga "digniin"- taasi waa digniin adag ee boliis. Macnaheeduna waa ilmahaagu inuu qirtay inuu sharcigii jabshay balse aan la geyn doonin maxkamad loona gelin doonin diiwaankiisa dambi.

→ Haddii aanan la siin ilmahaagu " Digniin" waxyaabahan soo socda midkood ayaa dhici kara:

- In ilmahaaga la xukumo laguna sii daayo " Dammaanad". Taasi macnaheedu waa in loo ogolaado inuu ka baxo saldhigga. Waxaase la weydiisan doonaa inuu saxiixo dukumeenti ama qoraal ay ku balan qaadayaan inay maxkamadda tagi doonaan maalinta la cayimay. Boliisku waxay ku dari karaan dammiintaas shuruudo kale; ama
- In ilmahaaga laga siidaayo saldhigga boliiska asagoon la xukumin. Balse, ay dhici kadho in loosoo diro warqad loogu tififtirayo in dambi lagu soo oogay. Warqaddu waxay tilmaami doontaa maalinta iyo waqtiga looga baahanyahay inay tagaan maxkamadda. Warqaddaas waxaa la yiraahdaa " Wacasho"; ama
- Xaalado gaar ahoo adag, boliisku waxay damci karaan inay ilmahaaga sii hayaan ilaa maalinta dambe ee maxkamadda caruurta la horgeyn doono. Taasi waxaa la yiraahdaa "xabsi ku hayn". Haddii ay taasi dhacdo waa inaad talo qareen ama looyar heshaa. weliba waa inaad boliiska weydiisaa halka lagu hayn doono iyo sidii aad ula xiriiri lahayd.

→ Haddii ilmahaagu ay tahay inuu maxkamadda tago, waxaa habboon inaad la tagtaa.

*"Haddii qofka dhalinyarada ahi horjooge wanaagsan ka helo guriga, qoyskuna taageeraan, waxay u badantahay inaysan dib-u jebin sharciga. Haddaba waxaa habboon inaad maxkamadda u raacdid si aad ugu muujisid taageeradaada. Taasi waxay kaloo ka caawin kadhaa inuu helo xukun dabacsan".*

Garsoore Jenifar Koote
Madaxweynihii hore,
Maxkamadda Caruurta Fiktooriya

Soosaaraha warqaddan macluumaadka ahi waa Barnaamijdka Qofka Isku-taliska ah iyo Tixraaca Dhalinyarada (YRIPP). Maaha talo sharci ah. Dhalinyaradu **waxay kaheli karaan talo sharci ah oo lacag la'aan ah saldhigga boliiska** iyagoo wacaya 1300 79 11 89. Sidoo kale, talo sharci ah waxay ka heli karaan **markii ay saldhigga ka tagaan** iyagoo wacaya Sharcidhalinyaro (9611 2412) ama Gargaarka Sharciga Fiktooriya (9269 0407). YRIPP xilkama saarna ficilkii ka yimaada macluumaadkan. Jiritaanka Macluumaadkani waa 2 Agoosto 2006.

YRIPP waxay iskaashi la wadaagtaa Xarunta Dhaqammada kala duwan ee Arrimaha Dhalinta, Golaha Arrimaha Dhalinyarada Fiktooriya, Boliiska Fiktooriya, Midowga Xarumaha Sharciga Bulshada, Adeegyada Sharciga Aboorijanka Fiktooriya iyo Kahortagga Dambiyada iyo Qalalaasaha (Curiyaha Barnaamijka).